**OGEYSIISKA SCREENING-KA – Hubinta xuduudda dibadda**

**Ka gudbid aan la oggolayn oo hawada ah**

Waxaad joogtaa garoonka diyaaradaha ee _______________, oo ku yaal _____________, dalka Talyaaniga, kaas oo ka tirsan Midowga Yurub. Waxaan ku ogeysiinaynaa inaan halkan u joogno inaan ku taageerno; haddii aad su'aalo qabto ama aad u baahan tahay caawimaad, ha ka waaban inaad weydiiso.

Waxaad xaq u leedahay inaad ka faa'iidaysato adeegyada turjumaadda iyo dhexdhexaadinta dhaqanka ee la heli karo, si loo hubiyo isgaarsiin sax ah oo lala yeesho Hay'adaha ay khusayso. Sidoo kale, wakhti kasta waxaad weydiin kartaa su'aalo oo aad codsan kartaa faahfaahin. Haddii ay suurtagal tahay, waxaad codsan kartaa inaad la hadasho nin ama haweeney.

1. **<u>Shuruudaha gelitaanka</u>**

Waqtigan xaadirka ah weli si sharci ah looguma oggola inaad gasho Midowga Yurub, sababtoo ah ma aadan raacin xeerarka gelitaanka, sidaas darteed Hay'aduhu waa inay sameeyaan hubin loo yaqaan screening. Inta hawshani socoto, dhammaan xuquuqda iyo waajibaadka uu dhigayo sharciga qaranka, kan caalamiga ah iyo kan Midowga Yurub ayaa weli lagu dabaqayaa.

2. **<u>Hawlaha screening-ka</u>**

Hawlaha screening-ku waxay ka dhici karaan Xafiisyo kala duwan oo ku yaal garoonka diyaaradaha aad joogto.

Kuwa soo socda waa tallaabooyinka ay Hay'aduhu qaadaan iyadoo la raacayo Xeerka screening-ka:

- Baaritaan jireed oo lagu sameeyo qofka iyo alaabtiisa gaarka ah sababo amni awgood.
- Hubinta aqoonsiga, ururinta xogta shakhsiga ah (magaca, taariikhda iyo goobta dhalashada, jinsiyadda), iyo soo bandhigista dukumentiyada aqoonsiga iyo safarka ee laga yaabo inaad haysato. Haddii aan dukumentiyada la soo gudbin, waxaa laga yaabaa in loo arko inaadan la shaqaynayn Hay'adaha.
- Sheegidda haddii aad tahay qof aan lahayn dhalasho.
- Sheegidda joogitaanka xubnaha qoyska kula socda si aad u wada joogtaan.
- Sheegidda sababta aad Talyaaniga u soo gashay.
- Xogtaada shakhsiga ah waxaa lala wadaagi karaa Hay'adaha ay khusayso, laakiin looma gudbin doono dad kale haddii aadan oggolaan.
- Qaadka faraha iyo sawir aqoonsi.
- Hubinta xogta ku jirta nidaamyada dijitaalka ah ee qaranka iyo Yurub sababo amni awgood.

- Ururinta iyo kaydinta xogta, oo keliya muddada loo baahan yahay, si loo maareeyo habraaca.
- Baaritaan caafimaad si loo qiimeeyo baahiyaha caafimaad ee degdegga ah ama go'doonka caafimaad, iyo in la helo daryeel caafimaad oo takhasus leh ama taageero nafsiyeed.
- Wareysi gaar ah oo lagu qiimeeyo xaaladaha nuglaanshaha ama baahiyaha gaarka ah, iyo in si degdeg ah loo sheego xaaladaha nuglaanshaha gaarka ah.

Haddii aad ku jirto xaalad baahi gaar ah, waxaa muhiim ah inaad isla markiiba u sheegto Hay'adaha, tusaale ahaan haddii aad ka yar tahay 18 sano, aad u baahan tahay daryeel caafimaad, aad tahay haweeney, lesbian, gay, bisexual, transgender ama intersex, aad tahay qof naafo ah, aad u baahan tahay taageero nafsiyeed, aad tahay qof waayeel ah, aad tahay waalid keligiis/keligeed ah oo leh carruur aan qaangaarin, aad qabto cudurro daran ama xanuunno maskaxeed (oo ay ku jirto xanuunka walbahaarka ka dib dhacdo naxdin leh), aad uur leedahay, aad ka badbaadday jirdil, kufsi ama noocyo kale oo rabshad nafsiyeed, jireed ama galmo oo daran, tusaale ahaan aad tahay dhibbane rabshad ku salaysan jinsiga, gudniinka fircooniga ah, guur carruureed ama khasab ah, ama rabshad loo geysto sababo galmo, jinsi, isir ama diin, ama aad tahay dhibbane ka ganacsi dadka (ujeeddo galmo, shaqo ama mid kale, ama xitaa in lagugu qasbay guur).

Haddii aad ka yar tahay 18 sano, Talyaaniga waxaa laguu aqoonsanayaa inaad tahay ilmo/aan qaan-gaarin, taas oo ka dhigan inaad heli doonto soo-dhaweyn iyo taageero ku habboon baahiyahaaga iyo da'daada. Sidoo kale, haddii aadan la socon waalidkaa ama qof weyn oo sharci ahaan mas'uul kaa ah, waxaa ku matali doona qof weyn oo ku caawinaya si loo hubiyo xuquuqdaada.

Haddii aad haysato dukumentiyo ama shahaadooyin caafimaad oo xaqiijin kara waxa aad sheegtay, tus sida ugu dhakhsaha badan.

Se hai meno di 18 anni sei considerato/a un/a minore in Italia e questo significa che riceverai accoglienza e sostegno adatti alle tue esigenze e alla tua età. Inoltre, se non sei accompagnato/a da genitori o da persone adulte legalmente responsabili sarai rappresentato/a da una persona adulta che ti assisterà per garantire i tuoi diritti.

Se hai documenti o certificati medici che possono confermare ciò che racconti, mostrali il prima possibile.

- Ururinta macluumaad ku saabsan adiga, xubnaha qoyskaaga iyo safarkaaga laga soo bilaabo dalkaagii asalka ahaa ilaa dalka aad hadda joogto.
- Dhamaystirka screening-ka iyadoo foomka la saxiixayo lana siinayo nuqul, ka dib marka la hubiyo, la xaqiijiyo ama la codsado in wax laga beddelo macluumaadka ku qoran foomka.
- Screening-ka waa in lagu dhammaystiraa saddex maalmood gudahood laga bilaabo marka aad isku soo bandhigto Hay'adaha ama lagaa helo garoonka diyaaradaha.

Dhammaan macluumaadka aad bixiso inta hawshani socoto waa qarsoodi: waligood lama siin doono dadka aan ku lug lahayn habraacan.

3. **Xuquuqda iyo waajibaadka inta lagu jiro screening-ka**

- Inta lagu jiro screening-ka, waxaad xaq u leedahay inaad hesho cunto, hoy, daryeel caafimaad (jidheed iyo maskaxeed), iyo in lagula dhaqmo si sharaf leh iyadoo la ixtiraamayo xuquuqdaada aasaasiga ah.
- Haddii aad qabto dhibaato caafimaad, aad u baahan tahay taageero nafsiyeed ama nooc kale oo taageero ah, ama aad rabto inaad soo sheegto dhacdooyin ka dhacay dalkaagii asalka ahaa, intii aad safarka ku jirtay ama aad xuduudda ka gudbaysay, waxaad arrintaas u sheegi kartaa Hay'adaha ay khusayso ama shaqaalaha ku caawinaya.
- Waxaad xaq u leedahay inaad la xiriirto qof ama hay'ad kasta oo bixisa talo iyo caawimaad, oo ay ku jirto caawimaad sharci.
- Haddii aad u aragto in xuquuqdaada aasaasiga ah aan la ixtiraamin inta lagu jiro screening-ka, waxaad xaq u leedahay inaad u gudbato Hay'adaha ay khusayso.
- Waxaa waajib kugu ah inaad diyaar u ahaato Hay'adaha screening-ka oo aad joogto goobta laguu qoondeeyey inta hawshu socoto, iyo inaad bixiso macluumaad sax ah oo dhammaystiran marka lagaa codsado, si Hay'aduhu u hubiyaan xaqa aad u leedahay inaad gasho oo aad ku noolaato dhulka Talyaaniga.
- Waxaa waajib kugu ah inaad la shaqayso Hay'adaha, gaar ahaan inaad bixiso:
    - magaca, taariikhda dhalashada, jinsiga iyo jinsiyadda;
    - dukumentiyada aad haysato ee lagu xaqiijin karo aqoonsigaaga;
    - farahaaga iyo sawirkaaga, kuwaas oo ay qaadi doonaan shaqaalaha loo xilsaaray.

  Haddii aadan la shaqayn Hay'adaha, waxaa laga yaabaa inay taasi keento cawaaqib xun oo la xiriira habraacyada dambe ee lagu dabaqi doono.
- Waxaa lagaa doonayaa inaad bixiso macluumaad dhammaystiran oo sax ah, adigoo caddeynaya macluumaadka aadan xasuusan iyo/ama aadan awoodin inaad bixiso.

4. **Xaqa aad u leedahay inaad codsato ilaalin caalami ah**

- Haddii aad ka baqayso inaad ku laabato dalka aad muwaadin ka tahay (ama, haddii aadan lahayn dhalasho, dalka aad caadi ahaan deggenayd), sababtoo ah noloshaada iyo/ama xorriyaddaada ama tan xubnaha qoyskaaga ay khatar ku jirto, ama aad ka baqayso jirdil,

tacaddi daran ama xadgudub, waxaad xaq u leedahay inaad codsato ilaalin. Haddii lagu silciyey ama aad ka baqayso in lagu silciyo sababo la xiriira jinsiyaddaada, dhalashadaada, ka tirsanaanshaha koox qowmiyadeed, diintaada ama fikirkaaga siyaasadeed, ama haddii aad ka tirsan tahay koox bulsho gaar ah oo aad ka baqayso rabshad ama in addoonsi laguu geysto, ama aad ka baqayso in lagu xukumo dil, lagu jirdilo, ama aad ka timid goob dagaal, waxaad codsan kartaa ilaalin.

- Haddii aad rabto inaad codsato ilaalin caalami ah, si cad ugu sheeg inta lagu jiro screening-ka oo u sharax sababaha Hay'adaha ay khusayso.
- Haddii aad codsato ilaalin caalami ah, waxaad xaq u leedahay in lagu wareejiyo xarun soo-dhaweyn oo ku habboon baahiyahaaga.
- Waa inaad codsigaaga ku soo gudbisaa Talyaaniga, maadaama aad halkan timid oo aad hadda joogto. Adigu ma dooran kartid dalka mas'uulka ka noqonaya kiiskaaga, laakiin baahiyaha la xiriira midnimada qoyska waa la tixgelin doonaa.
- Haddii aad xubno qoyskaaga ah ku leedahay waddan ka tirsan Midowga Yurub, u sheeg Hay'adda mas'uulka ka ah screening-ka; tani waxay caawin kartaa qiimeynta haddii aad xaq sharci ah u leedahay inaad dib ula midoowdo.
- Haddii aad codsato ilaalin caalami ah, waa inaad ku sii jirtaa Talyaaniga mana u wareegi kartid waddan kale oo xubin ka ah Midowga Yurub adigoon oggolaansho ka haysan Hay'adaha. Haddii aad Talyaaniga ka baxdo ka hor inta aan go'aan laga gaarin codsigaaga ilaalinta caalamiga ah, tani waxay saameyn ku yeelan doontaa habraacaaga, sababtoo ah qofka codsanaya ilaalinta waa inuu marka hore sugaa go'aanka ku saabsan dalka mas'uulka ka ah codsiga. Haddii aad waddan kale u gudubto ka hor go'aankan, Hay'aduhu waxay ka noqon karaan hoyga lagugu siiyey xarunta.
- Talyaaniga waxaa ka jira habraacyo kala duwan oo lagu qiimeeyo codsigaaga ilaalinta caalamiga ah: habraaca caadiga ah, habraaca la dedejiyey oo leh waqtiyo ka gaaban, iyo habraaca la dedejiyey ee xuduudda, kaas oo aad u degdeg badan oo lagu dabaqo meelaha Talyaanigu u aqoonsan yahay aagagga xuduudda ama transit-ka.
- Habraacyada kala duwan iyo muddadooda waxaa laguu sharxi doonaa waqti dambe, maadaama habraaca uu dhigayo sharciga Talyaaniga, Hay'adaha Talyaaniguna ay ku dabaqayaan iyadoo lagu salaynayo xaaladdaada gaarka ah.

Haddii aad ka yar tahay 18 sano oo aad tahay ilmo/aan qaan-gaarin oo aan la socon waalid ama qof weyn oo sharci ahaan mas'uul kaa ah, waxaad xaq u leedahay inaad hesho habraac gaar ah oo lagu siinayo oggolaanshaha joogitaanka sababo la xiriira da'daada yar.

## 5. Dib-u-celinta

Haddii aadan codsan ilaalin caalami ah oo aadan buuxin shuruudaha gelitaanka, waxaa lagugu celin karaa dalkaaga asalka ah ama waddan kale oo laguu oggol yahay inaad gasho oo aad ku noolaato, iyadoo lagu salaynayo go'aan dib-u-celin ah.

6. **<u>Dib-u-dejin</u>**

Waxaa sidoo kale lagu wareejin karaa waddan kale oo xubin ka ah Midowga Yurub oo go'aansada inuu qaabilo codsigaaga ilaalinta caalamiga ah; habraacan waxaa loo yaqaan dib-u-dejin (relocation).

7. **<u>Habraaca lagu dabaqi karo</u>**

Marka screening-ku dhammaado, waxaa lagu siin doonaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ilaalinta caalamiga ah, dib-u-celinta ama dib-u-dejinta, iyadoo ku xiran habraaca lagu dabaqi doono kiiskaaga.

8. **<u>Ilaalinta xogta</u>**

Xusuusnow in xeerarka Midowga Yurub ee ilaalinta xogta ay ku siinayaan xaqa aad u leedahay inaad hesho xogtaada shakhsiga ah, taas oo ah macluumaadka adiga kugu saabsan ee aad wadaagtay, inaad saxdo iyo inaad codsato in laga tirtiro kaydadka xogta Talyaaniga iyo Yurub ee lagu diiwaangeliyey inta lagu jiro habraaca, iyadoo la raacayo shuruudaha uu sharcigu dhigayo.

Xusuusnow inaad mar walba xaq u leedahay in lagugu wargeliyo habraacyada ku khuseeya, inaad codsato faahfaahin, iyo inaad wakhti kasta la hadli karto shaqaalaha aad la kulanto inta aad ku jirto safarkaaga Talyaaniga.